



## **XARUNTA DAWLADDA EE DEGMADA HENNEPIN HADDA WAY XIRAN TAHAY.**

- **Adeega shaqsiiga oo kooban** ayaa waxaa laga heli karaa Xarunta Maxkamadda Qoyska ee cinwaadkeedu yahay:  
  
110 South Fourth Street  
Minneapolis, MN 55401  
Saacadaha 8:00 a.m. - 4:30 p.m.  
Maalmaha: Isniinta ilaa Jimcaha, marka laga reebo maalmaha Fasaxa.  
  
\*fiiri bogga dambe ee khariidadda
- Si aad ballan uga qabsato xafiiska dhageysiyada si aad uga doodo tigidh lagu siiyey ama aad u bixiso ganaaxa tigidh lagu siiyey, ka wac Barta Lacag-bixinta Maxkamadda halkaan:
  - Magaalada gudaheeda: 651-281-3219
  - Degmooyinka ka baxsan magaalada : 1-800-657-3611
- Qofkii doonaya inuu toos u bixiyo lacagtii ganaaxa wuxuu ka dhiibi karaa Xarunta Maxkamadda Qoyska oo ciinwaankeedu yahay:  
  
110 South Fourth Street  
Minneapolis, MN 55401  
Saacadaha 8:00 a.m. - 4:30 p.m.  
Maalmaha: Isniinta ilaa Jimcaha, marka laga reebo maalmaha fasaxa.
- Haddii aad dhigeeyso lacag dammaanad ah, waxaad ka bixin kartaa daaqadda Xarunta Amniga Dadweynaha ee Maxkamadda Degmada ee Ridgedale Courthouse (12601 Ridgedale Drive, Minnetonka, MN 55305), inta lagu jiro saacadaha shaqada. Saacadaha shaqada wixii ka baxsan lacagta damaanadda waxaa laga aqbalayaa daaqadda laga diinwaan geliyo dadka lasoo xiro ee Xarunta Amniga Dadweynaha - Public Safety Facility oo ciinwaankeedu yahay (401 S. 4<sup>th</sup> Avenue, Minneapolis, MN 55415).
- Xafiiska laga dalbado adeega nuqullada hadda wuu xiran yahay. Haddaad dooneeyso in lagu daabaco nuqulka kiiskaaga codsi qoraal ah ayaad boostada ugu soo diri kartaa Maxkamadda, ama waxaad ka buuxsan kartaa codsiga nuqulka kiiskaga bartaan internet-ka [www.mncourts.gov/hennepin](http://www.mncourts.gov/hennepin) (taabo "Court Orders"). Kombuterada dadweynaha ka baaran karaan macluumaadka ee maxkamadda gudaheeda waxeey furan yihiin saacadahaan: 8:00 am - 12:00 pm.
- Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan dhageysiga kiiskaaga ee lagu qabanayo Zoom-ka, ama wixii kale ee macluumaad ah oo ku saabsan goobta lagu qabanayo dhageysiga kiiskaaga, soo wac barta Lacag-bixinta Maxkamadda (lambarrada kor ku xusan) ama lambarka Barta Xiriirka Guud ee Maxkamadda ee ah 612-348-6000.

 **MINNESOTA  
JUDICIAL BRANCH**  
FOURTH JUDICIAL DISTRICT

- Haddii aad maanta leedahay ballanta kiiskaaga oo lagu qabanayo Zoom-ka oo aad u baahan tahay in lagaa caawimo dhanka qalabka farsamada, waxaad aadi kartaa Xarunta Maxkamadda Qoyska si aad halkaas ugu isticmaasho qalab lacag la'aan ah (cinwaanka iyo saacadaha ay Maxkamaddaa Qoysku furan tahay kor ayaan ku soo xusnay).
- Waraaqaha waxaa lagu xereyn karaa boostada, elektaroonig ahaan, ama waxaad ku ridi kartaa sanduukha waraaqaha lagu rido ee Xarunta Maxkamadda Qoyska. Hubso inaad ku darto wixii lacag ah ee looga baahan yahay waraaqahaaga.
- Wixii caawimaad ah ee ku saabsan diiwaangelinta maxkamadda, oo ay ku jiraan foomamka maxkamadda, fadlan ka wac Barta Adeegga Is-Caawinta ee Degmada Afraad lambarkaan 612-348-9399 una dhaaf fariin. Shaqaalaha ayaa dib kuu soo wici doona maalmaha shaqada 1 ama 2 maalmood gudahood.
- Haddii aad waaxda Adeegyada Maskaxda la leedahay ballan ku saabsan wareeysiga Rule 20, wareeysiyadaas badankood waxaa lagu qabanayaa Xarunta Maxkamadda Qoyska ama Xarunta Caddaaladda dhalinyarada. Ka wac shaqaalaha Adeegyada Maskaxda lambarkaan: 612-348-3723.

**Family Justice Center  
(Xarunta Maxkamadda Qoyska)**  
110 South Fourth Street  
Minneapolis, MN 55401

8:00 a.m. - 4:30 p.m. Isniinta - Jamcaha, marka laga reebo maalmaha fasaxa.

